

Lacagta xannaanada carruurta iyo SFO (nidaamka haynta carruurta ee iskoolka ka hor iyo kaddib) oo la dhimay

Qiimaha xannaanada carruurta iyo SFO waa in aysan ilmihiiба ka badan boqolkiiba 6 dakhliga qofka – iyo midka raasumaalka ee ay canshuurtu ku waajibtay. Haddii uu qiimuhu ka bato boqolkiiba 6, waxaad markaas codsan kartaa in lagaa dhimo lacagta ay waalidku bixiyaan. **Taas oo ka dhigan in qoysaska uu dakhligoodu hooseeyo in ay xannaanada carruurta iyo SFO ku bixin karaan lacag intaaS aad uga yar.**

Dakhliga qofka – iyo midka raasumaalka ee ay canshuurtu ku waajibtay waxaan ula jeednaa midka dadka is qaba, dadka isku jinsiga ah ee wada nool iyo lammaanaha wada nool ee deggan ciwaanka uu ilmuu uga jiro diiwaanka dadweynaha.

Haddii uu ilmuu laba meelood deggan yahay, markaas lacagta ay waalidku bixinayaan waxaa lagu salaynayaa dakhliga labada waalid kooda deggan ciwaanka uu ilmuu uga jiro diiwaanka dadweynaha.

**Degmada Bergen waxay leedahay xedad dakhli iyo nidaamyo kala duwan oo lacag dhimis ah**

Lacagta aad bixinayso waxaan u eegaynaa qiimaha ugu sarreeya ee hadda lagu bixiyo xannaanada carruurta iyo SFO, dakhliga qoyska iyo da'da ilmaha. Degmada Bergen waxay leedahay nidaamyo kala duwan oo lacag dhimis ah. Halkaan ayaad ka helaysaa xedadka dakhliga iyo nidaamyada kala duwan ee go'aaminaya qiimaha aad ku bixinayso xannaanada carruurta iyo SFO (af-norwiji oo keliya ayuu ku qoran yahay): [www.bergen.kommune.no/redusert-foreldrebetaling](http://www.bergen.kommune.no/redusert-foreldrebetaling)

**Qiimadhinka walaalaha ayaa laguu samaynayaa haddii ay carruur kale kuu dhigtaan xannaanada carruurta / SFO, taas oo aan ku xirnayn dakhliga qoyska.**

**Si aad u hesho qiima dhimis, waa in aad codsi xaraysaa**

Halkaan ayaad ka helaysaa foomka codsiga: [www.bergen.kommune.no/redusert-foreldrebetaling](http://www.bergen.kommune.no/redusert-foreldrebetaling)

Codsiga si elegtaroonig ah ayaa loo diraa, si aad u codsatana waa in aad leedahay Bank ID, Min ID ama wax la mid ah.

Haddii aad leedahay dhawr carruur ah, isla codsigaas ayaad ilmo kasta ugu codsanaysaa. Si otomaatig ah ayaa loo samaynayaa xisaabinta codsigaaga.

**Si aan u xisaabinno qiimaha aad ku bixinayso xannaanada carruurta iyo SFO oo aan codsigaaga uga baaraandegno, waa in aad codsiga ku soo lifaaqdaa caddaynta dakhliga ay canshuurtu ku waajibtay ee qoyska:**

- Canshuur-celintii u danbaysay
- Canshuur-celinta kaddib haddii ay dakhliga ku soo kordheen isbeddello waaweyn oo waaraya, waxaad markaas ku soo lifaaqi kartaa saddexdii warqadood ee mushaar-bixinta ee ugu danbeeyay.
- Go'aanka caawinta khasnadda amaahda waxbarashada iyo kaarka ardaynimada
- Go'aan ka soo baxay NAV
- Haddii aad NAV ka sugeyso in ay xaaladdaada kala caddeyso, waa in aad taas caddaynteeda ku soo lifaaqdaa.

**Haddii aad dhowaan Norway timid oo aadan lahayn canshuur-celin, waa in aad ku soo lifaaqdaa caddaynta in aad haysato oggolaashada joogintaanka Norway.**

#### **Goorma ayuu codsigu dhaqangelayaa**

Codsiga lacag dhimista waalidka wuxuu dhaqangelayaa laga billaabo bisha ka danbaysa markii codsiga la helay. Marka codsiga laguu oggolaado ayaan go'aanka kuu soo diraynaa.

#### **Haddii aadan lahayn lambarka dhalashada ama aadan codsiga u xarayn karin hab elektaroonig ah**

Adeegga dadweynaha ayaa kaa caawin kara sidii aad u codsan lahayd,

Lambarka telefoonku waa 55 56 55 56. Ciwaanku waa Kaigaten 4.

Kulanka u soo qaado aqoonsi shaqaynaya iyo caddaymihi codsiga.

#### **FG! Xusuuso in aad codsato sanad xannaano carruureed/SFO walba.**

Go'aanka lagu dhimayo lacagta ay waalidku bixinayaan markiiba hal sano ayuu shaqaynayaa.

Si lagaaga dhimo lacagta aad bixinayso bisha ogoosto, waa in aad codsiga cusub soo dirtaa ugu danbayn bisha luuliyo gudaheeda.